Social Security

Sidee Ayaan Go'aan Uga Gaarnaa Haddii Aad Weli XAq U Leedahay Macaashka Naafanimada

www.socialsecurity.gov

Sidee Ayaan Go'aan Uga Gaarnaa Haddii Aad Weli XAq U Leedahay Macaashka Naafanimada

Xaaladaha intooda badan, waxa ay waqrqaddani ku lfaaqan tahay waraaq laguu soo diray oo laguugu sheegayo in aan dib u eegeyno xaaladaada caafimaadka. Sharci ahaan ayey waajib nagu tahay, markii muddo la joogaba, xaaladda caafimaadka ee dhamaan dadka qaata macaashka naafanimada si loo xaqiijiyo in ay weli xaq u leeyihiin macaashka naafanimada.

Guud ahaan, haddii aanu caafimaadkaagu ka soo reyn, ma haddii aad weli naafo tahay, waxaa kuu sii soconaya macaashka.

waxaynu ururineynaa macluumaadka

Si aad nooga acawiso in aan go'aan gaarno, waxa ugu horeeya ee aan ururineyno waa macluumaadka ku saabsan xaaladaada caafimaadka.

- Waxaanu weydiineynaa dhakhtarkaaga, isbitaalka, iyo goobaha kale ee caafimaadka diiwaankaaga caafimaadka. Waxa aan weydiineynaa sida ay xaaladaada caafimaadka saameyn ugu yeelaneyso waxyaabaha aad qabato, natiijada baaritaanada, iyo daaweynta laguu sameeyey.
- haddii aynu dooneyno macluumaad dheeraad ah, waxaa laga yaabaa in aan ku weydiisano in aad marto baaritaan

dheeraad ah ama daaweyn aan kharashka la baxeyno.

Waxaynu eegeynaa waxyaabaha xaqiiqada ah

Marka xiga, waxa aan eegeynaa sida ay aheyd xaaladaada caafimaadka markii ugu dambeysay ee aan dib u eegnay xaaladaada. Waxaa kale oo aan eegeynaa haddii ay jiraan dhibaatooyin kale oo caafimaad oo dhinacaaga jira.

Waxa aan go'aan ka gaareynaa in xaaladaada caafimaadka ka soo reyneyso. Haddii aan go'aan ku gaarno in xaaladaada caafimaadku ka soo reysay, waxa aan go'aan ka gaareynaa in xaaladaada caafimaadka ay soo ka soo reysay oo aad shaqada dib ugu noqon karto.

waxa kale oo aan eegeynaa sida guud ahaan ay xaaladaada caafimaadku saamey ugu yeelatay shaqada aad qaban karto. Taas waxaa ka mid ah shaqadii aad horey u qaban jirtay iyo shaqooyinka kale oo laga yaabo in aad iminka qaban karto.

Sidee ayey saameyn ugu yeelaneysaa macaashkaaga

Haddii xaaladaadu ka soo reysay oo aan go'aan ku gaarno in aad shaqeyn karto, macaashkaaga waa la joojinayaa.

Macaashka aad ku qaadato naafonimada wuu istaagayaa haddii:

- Waxa aad wax ka baratay tababarka xirfadaha ama ama horumar laga gaaray xaga daawada ama tiknoolajiyada darteed, waad shaqeyn kartaa.
- Waxaan sameynay qalad markii ugu horeysay oo aan ogolaanay in aad naafo tahay ama aanu sii wadnay macaashka naafada.
- Ma raaceysida daaweynta uu dhakhtarku amray (sabab la'aan), waxaana suurtogal ah in aad shaqada ku noqon lahed haddii aad raaci laheyd daaweynta dhakhtarka.
- waxa aad na siisay macluumaad been ah ama marin habaabis ah markii aan gaarnay go'aankii hore.
- Nalama shaqeyneysid, mana jirto sabab macquul ah oo aadan noola shaqeyn karin.
- Waad shaqeyneysaa dakhliga ku soo gala bil kastana waxa uu muujinayaa in dakhli la taaban karo ku soo galo oo aad shaqo wanaagsan heysato. Lacagta aad shaqeysaneyo waa ayaanu u tixgelinay mid taaban karo oo si wanaagsan isu bedeleysa sanad kasta. Sida ay iminka tahay tirada, kala soco sanadlaha *Update* (Publication No. 05-10003). Hase yeeshee, xaaladani ma aha mid saameyn ku yeelaneysa Macaashka La Bixiyo ee Kabitaanka Dakhliga

Haddii aan go'aa, ku gaarno in lagaa joojiyo macashka naafada, oo aad nagi diidan tahay, waxa aad go'aankeena ka qaadan kartaa racfaan. Waxa ay taasi ka dhigan tahay in aad na weydiisan karto in aan dacwadaada dib u eegno. Marka aad naga hesho waraaq aan kuugu sheegeyno go'aankeena, waraaqda ayaa laguugu sheegayaa sida aad racfaan uga qaadan karto.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Soo booqo ***www.socialsecurity.gov*** markii aad doonto si aad u codsato mcaashka, kana furo *my* **Social Security** si aad u hesho daabacaadaha ugu dambeeyey, una akhrisato su'aalaha inta badan la is weydiiyo. Ama, nagala soo xiriir **1-800-772-1213** (ee dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay, waxay soo wici karaan lambarka TTY, **1-800-325-0778**). Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada. Waxa aan ka jawwbi karnaa su'aalaha aad qabtaan 7 subaxnimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Guud ahaan, muddo gaaban ayaad sugeysaa in laga jawaabo telefoonka haddii aad soo wacdo wixii ka dambeeya talaadada. Telefoonada oo dhan waa qarsoodi We also want to make sure you receive accurate and courteous service, so a second Social Security representative monitors some telephone calls. Macluumaadka waxa telefoonka ku heli kartaa 24 saac ee maalintii. Xusuusnaada, bogeena internetka ee, ***www.socialsecurity.gov***, oo meel kasta iyo xilli kasta soo booqan kartaan!

Social Security Administration
SSA Publication No. 05-10053-SO
How We Decide if You Still Have a Qualifying Disability (Somali)
November 2015

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha